# CITY OF SEATTLE (MAGAALADA SEATTLE)
# DEEQDAHA XASILLINTA DARYEELKA CARRUURTA

## Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee Loogu Talagalay Deeqdaha Bixiyaha Daryeelka Carruurta

**Yaa u qalma inuu codsado deeqda?**

Maal gelinta waxaa helaaya daryeel bixiyaasha carruurta ee ruqsada leh (0-12) iyo barnaamijyada loogu talagalay keliya carruurta da'ada iskuulka ah. Daryeel bixiyaashu waa inay hadda furnaadaan oo ayna ka shaqeeyaan barnaamij sanadka oo dhan ah. **Waa inay ku hawlgalayaan gudaha Magaalada Seattle.** Barnaamijyada ka baxsan Seattle, oo ay ku jiraan goobaha baadiyaha ah ee Degmada King, **uma qalmaan** fursaddan deeq bixinta. Daryeel bixiyaasha u adeega carruurta da'ada iskuulka ah, kana reeban shatiga kuwaas oo ka hawlgala gudaha Magaalada Seattle way u qalmaan iyadoo ku xiran shuruudo. *

*Daryeel bixiyaasha u adeega carruurta da'ada iskuulka ah, kana reeban shatiga waa inay bixiyaan daryeelka carruurta inta lagu jiro sanad dugsiyeedka haddana waa inay ahaadaan kuwo shaqeeya maalin buuxda. Kaamyada uma qalmaan. Ujeedada koowaad ee barnaamijku waa inay noqotaa daryeelka carruurta.

**Waa maxay cadadka deeqda?**

Deeqaha waxaa lagu bixin doonaa cadadyada soo socda:

| Cadadka Deeqda Aasaasiga ah | Awooda Shatiga/Awooda Barnaamijka<br><br>Tirada Carruurta Loo Adeego |
|---|---|
| $5 000 | 0-12 |
| $6 000 | 13-29 |
| $7 000 | 30-49 |
| $8 000 | 50-74 |
| $9,000 | 75-99 |
| $10 000 | 100+ |

**Waxyaabaha Dheer Abaalmarinta Bixiyaha Daryeelka Carruurta**

Daryeel bixiye kasta oo hela abaalmarin wuxuu u qalmi doonaa waxyaabo kale oo dheeraad ah. Korodh kasta oo daryeel bixiyuhu u qalmo waxay wadarta abaalmarintiisa ku dari doontaa $750.00 oo dheeraad

ah. Wadarta abaalmarinta kama badnaan karto $10,000. Waxyaabaha korodhka ah ee loo qalmi karo waxaa ka mid ah:

- U adeegida tiro aad u badan oo ah qoysaska qaata lacagaha kasibta ah ee gobolka ama magaalada.
- Bixinta Daryeelka Habeenkii/Dheeraadka ah kaas oo ku saleysan macluumaadka ku qoran Foomka Daryeelka Carruurta. Daryeelka Habeenkii ah/saacadaha la kordhiyay waxaa ka mid ah daryeelka ka baxsan saacadaha 5:00 Subaxdii illaa 7:00 Habeenkii ah Isniinta-Jimcaha.

**Deeqahaani ma yihiin kuwo loo tartamo?**

Maya, deeqaha ma ahan kuwo loo tartamo. Si kastaba ha noqotee, uma badna inay jiri doonto lacag ku filan oo lagu abaalmariyo dhammaan daryeel bixiyaasha soo codsada. Sidaa daraadeed, abaalmarinta ayaa mudnaan la siin doonaa iyadoo lagu saleynaayo shuruudaha soo socda:

| Heerka | Shuruuda |
|---|---|
| **1** | Buuxinaya labada shuruudoodba:<br>• U adeegey ilmo ku jira Daryeelka Caruurta Connections Child Care (Iskuxirka Daryeelka Carruurta) (WCCC)/Barnaamijka Caawimaada Daryeelka Carruurta (CCAP)/Guri Laaweyaasha 12-kii bilood ee la soo dhaafay.<br>• Ka hawlgala/ku yaala aag juqraafiyeed oo mudnaan leh* |
| **2** | Buuxinaya mid ka mid ah labada shuruud:<br>• U adeegey ilmo ku jira Daryeelka Caruurta Connections Child Care (Iskuxirka Daryeelka Carruurta) (WCCC)/Barnaamijka Caawimaada Daryeelka Carruurta (CCAP)/Guri Laaweyaasha 12-kii bilood ee la soo dhaafay.<br>• Ka hawlgala/ku yaala aag juqraafiyeed oo mudnaan leh* |
| **3** | U qalma laakiin aanan buuxin mid ka mid ah shuruudaha lagu qeexay Heerarka 1-2 |
| *Shuruudaha waxaa dib loogu eegi doonaa Tusmada Sinnaanta Bulshada iyo Jinsiyada ee Magaalada Seattle. Si ay ugu qalmaan, codsadayaashu waxay ubaahan doonaan inay kujiraan meelaha ugu sareeya ama meelaha labaad ee ugu sareeysa ee liidashada. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tusmada, ka eeg halkaan. | |

**Daryeel bixiyaasha miyey u baahan yihiin inay ku hawlgalaan awood buuxda oo shatiga ah si ay ugu qalmaan deeqda?**

Maya. Daryeel bixiyaasha **UMA** baahna inay ku hawlgalaan **awood buuxda oo shatiga ah** si ay ugu qalmaan deeqda.

**Daryeel bixiyuhu ma looga baahan yahay inuu u adeego qoysaska helaaya kaalmada daryeelka carruurta ee Working Connections ama ka diiwaangashan Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta (CCAP) si uu ugu qalmo deeqda?**

Maya. Daryeel bixiye kasta oo shati ku leh aaga magaalada Seattle wuu codsan karaa deeqda, haddii ay qaadanayaan kaalmada Daryeelka Carruurta Working Connecions (WCCC) ama Kaalmada Daryeelka Carruurta (CCAP) iyo haddii kalaba.

**Deeqdaan maxaa loo isticmaali karaa?**

Si loo helo deeqda, daryeel bixiyaasha loo xushay inay helaan deeqda iyada oo loo maraayo hanaankaan waxaa looga baahan doonaa inay saxiixaan heshiis lagu xaqiijinayo in macluumaadka lagu qorey foomka codsiga uu yahay mid sax ah oo run ah sida ugu fiican ee uu u yahay qofka bixinaya macluumaadkaas iyo xaqiijinta in lacaga deeqda loo isticmaali doono oo keliya in lagu taageero hawlgalka ganacsiga daryeel bixiyaha. Tusaalooyinka isticmaalka deeqda ee la oggol yahay waxaa ka mid ah in shaqaalaha lagu siiyo mushaharka, joogteynta saacadaha shaqada, iyo nadaafad dheeraad ah ama kharashyada kale ee la xiriira si nabdoon u hawlgalka inta lagu jiro cudurka safmareenka ah. **Daryeel bixiyaasha waxaa looga baahan doonaa inay keydiyaan diiwaanada la xiriira isticmaalka lacagaha oo diiwaanka la wadaagaan Magaalada Seattle haddii laga codsado.**

**Deeqaha ma si buuxda baa loo bixin doonaa?**

Cadadka deeqda oo buuxda ayaa loo bixin doonaa si buuxda/isla markiiba ah, ka dib marka la oggolaado codsiga. Daryeel bixiyaasha waxaa la siin doonaa lacagta iyadoo la isicmaalayo EFT ama jeeg warqad ah taas oo boostada loogu dirayo cinwaanka ku qoran codsiga deeqda. Lacagaha la siinaayo daryeel bixiyeyaasha waxaa la soo diri doonaa inta u dhexeysa Febaraayo 15, 2021 - Maarso 17, 2021.

**Haddii aan ahay hay'ad leh goobo badan oo lagu daryeelo carruurta oo shati leh kuna salaysan Seattle, ma waxaan u baahanahay inaan codsi gooni ah u soo gudbiyo goob kasta?**

Haa, fadlan codsi gooni ah u buuxi goob kasta oo deeqda u qalanta oo shatiyeysan. Hay'adaha leh goobo badan oo shatiyeysan waxaa loo oggol yahay inay codsiyo u soo gudbiyaan mid kasta oo goobahaas ka mid ah.

**Waraaqo/dukumentiyo noocee ah ayaan ubaahanahay inaan soo gudbiyo?**

Kadib ogeysiinta abaalmarinta deeqda, waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso shatiga ganacsiga Gobolka Washington oo leh Aqoonsiga Ganacsiga (UBI) ama shatiga daryeelka carruurta ee DCYF iyo W-9 oo dhameystiran oo saxiixan.  Daryeel bixiyaasha la ansixiyay ayaa sidoo kale looga baahan doonaa inay Magaalada Seattle la saxiixaan Heshiiska Sharciyeed ee Deeqda, kaas oo lagu soo diri doono DocuSign.

**Lacagaha deeqda mala canshuuraa**

Lacagta deeqda ah waxaa loo tixgeliyaa dakhli ahaan. Marka laga hadlayo canshuur ka qaadista, deeqaha waa in loola dhaqmaa si la mid ah dakhliyada kale ee soo gala ganacsigaaga.

**Daryeel bixiyeyaashu ma u baahan yihiin inay keydiyaan oo ay soo gudbiyaan risiityada la xidhiidha deeqdan?**

Daryeel bixiyaasha waxaa looga baahan doonaa inay keydiyaan diiwaanada la xiriira isticmaalka lacagaha oo diiwaanada la wadaagaan Magaalada/Maamulka haddii laga codsado.

**Ma jirtaa waqti kama dambeys ah oo lagu codsado deeqdan?**

Haa. Waqtiga kama dambaysta ah ee la codsanayo waa **Janaayo 27, 2021 ugu dambeyn habeen badhka.**

**Sidee daryeel bixiyuhu u codsadaa deeqda?**

Laga bilaabo Janaayo 15, 2021, daryeel bixiyayaashu waxay codsiyada deeqda ka heli karaan iimaylkooda. Kaliya daryeel bixiyeyaasha uqalma deeqda ee degan aaga Magaalada Seattle ayaa heli doona casuumaadda iimaylka ah.  Daryeel bixiyuhu waxa uu gujin doonaa lifaaqa codsiga deeqda, halkaasoo ay kaga jawaabi doonaan dhowr su'aalood oo gaagaaban oo ay kujiraan magaca ganacsigaaga, cinwaankaaga, lambarka aqoonsiga shatiga ee daryeel bixiyaha, iyo Lambarka Aqoonsiga Ganacsiga (UBI).

Codsiga deeqda ayaa laga heli karaa khadka tooska ah, iyo qaab pdf ah, oo ku qoran luuqadaha Ingiriis, Shiine fudud, Fiitnaam, Soomaali, iyo Isbaanish. Codsiga PDF-ka ah waa la daabici karaa, la buuxin karaa, loona gudbin karaa grants@childcare.org. Fadlan ku dar shatiga ganacsiga Gobolka Washington oo leh lambarka Aqoonsiga Ganacsiga (UBI) ama shatiga daryeelka carruurta ee DCYF iyo W-9 oo dhameystiran oo saxiixan.

**Haddii aad haysato barnaamijyo badan oo daryeelka carruurta ah oo u qalma deeqda oo shati haysta, waa inaad mid kasta u buuxisaa codsi gooni ah.**

Wixii su'aalo ama taageero dheeraad ah oo la xiriira buuxinta codsiga, fadlan la xiriir Tababarahaaga Guulgaarayaasha Hore (Early Achievers Coach). Haddii aadan haysan Tababare, khadkaTaageerada Adeeg bixiyaha ee Child Care Resources ka wac 1-800-446-1114.

**Ka waran haddii adeeg bixiye u baahdo caawimaad dhanka buuxinta codsiga ah?**

La xiriir Tababarahaaga ee Early Achievers si aad uga hesho wixii caawimaad ah. Haddii aadan garanayn qofka uu yahay Tababarahaaga, khadkaTaageerada Adeeg bixiyaha ee Child Care Resources ka wac 1-800-446-1114.

**Sidee iyo goorma ayuu daryeel bixiyaha u heli doonaa lacagta deeqda?**

Ogeysiiska abaalmarinta deeqda ee ugu dambeysa waxaa la sameyn doonaa usbuuca Febaraayo 15, 2021.  Dhammaan adeeg bixiyeyaasha waxaa lagu ogeysiin doonaa xaaladdooda abaalmarineed iyadoo loo marinayo iimayl. Daryeel bixiyaasha waxaa la siin doonaa lacagta iyadoo la isicmaalayo lacag dhigis toos ah oo bangiga ah ama jeeg warqad ah oo boostada loogu dirayo cinwaanka ku qoran codsiga deeqda. Lacagaha la siinayo daryeel bixiyeyaasha waxaa la soo diri doonaa muddada u dhexeysa Febaraayo 15, 2021 - Maarso 17, 2021.